

HADDII DABAYLO WAXYEELAAN GURGAAGA



Somali

Dabaylaho iyo duufaanaha waxyella deganayaasha waa suurtagal inay gooyaan adeegyada korantada, biyaha, bulaacadaha iyo gaaska. Waxaana dhici kara in wadooyinka, gegida diyaaradaha, dekedaha iyo laymanka telefoonadu xirmaan.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato degaan degdeg ah, adeega kaalmada samafalka, lacag, cunto iyo biyoh ka dib markay dhacaan daadad iyo dabaylo.

HADDII AAD CAYMIS KU JIRTO

- Wac shirkada caymiska isla markiiba maadama shirkadaha badankood ay bixiyaan adeega 24ka saacadoo
- Waxaa laga yaabaa inay ku siin karaan degaan degdeg ah, cunto iyo lacag cadaan ah dhibta timid darteed
- Xaqijihi in gurigaagu aamin yahay ka hor inta aadan ka bixin guriga amniqiisa darteed
- Ha isku deyin wax dayactir ah haddii aadan aqoonteeda lahayn maadaama taasi khatar gelin karto adiga iyo qoyskaaga ama keeni karto khasaare aan caymisku bixinayn
- Haddii aad qabto wax su'aalla oo ku saabsan caymiska, la xiriir Insurance Council of Australia tel **1300 728 228**

HADDIIAADAN CAYMIS KU JIRIN

Oo aan ehelkaaga iyo saaxiibadaa ku caawin karin la xiriir:

- Department for Child Protection (DCP) tel **0418 943 835** wixii caawima ah ee degaanka xaaladaha degdegtah ah, dharka, cuntada iyo waxyaallaha kale ee lagama maarmaanka ah
- Ka wac **1800 093 325** Department of Housing wixii la xiriira guryaha dadweynaha ama caawimada curaarta ijarka guriga la ijaaranayo haddii aad xaq u leedahay

Haddii gurigaaga si xun wax u gaareen aadna u baahan tahay caawimo, wac SES tel **132 500**

KORONTADA OO TAGTA

- Wac Western Power tel 131 351
- Wac Horizon Power tel 132 351 haddii aad ku noosahay meelaha magaalada ka baxsan (Hadaadan hubin ka eeg biilkii u dambeeeyey)

NADIIFINTA

- Bilaw nadiifinta gurigaaga agtiisa – isdulsaar waxyaallaha ay ka mid ka yihiin laamaha iyo haraaga meel ka fog mitirka biyaha, kantaroolyaasha iyo khadka telefoonka
- Wac dawlada hoose si aad u hesho talo ku saabsan qaadida qashinkha cagaaran iyo waxyaallaha kale sida deyr u samaynta asbestos-ka

*Wixii talo ah oo ku saabsan wixii la samaynayo ka hor, ka dib iyo inta ay socoto dabayshu booqo:
www.fesa.wa.gov.au*



Government of **Western Australia**
Fire & Emergency Services Authority

F E S A
Fire & Emergency Services
Authority of Western Australia